DALMAR: Taariikh Nololeedkii Ibraahin Ismaaciil

Qore: Ibraahin Ismaaciil iyo Eugène Gaspard Marin

[1]Tifatire (English): Dr. Richard Panchurst

Tifaftire (Somaali): Boodhari Warsame

Sebtember 23, 2013

Hordhac

Waxa aan xusuusannaa taxane taariikh-nololeed ah oo aan hadda ka hor la wadaagay akristeyaasha wardheernews.com (*Mahadhadii Maxammad Nuur*). Waxa aan filayaa in waxyaalo badani nooga kordheen oo ay ka mid ahayd xogtii ku saabsananyd "Warqaddii Maka" oo sheekadaa ka hor aan wax badan laga aqoon. Waxa kale oo aan is leeyahay waa laga kororsaday milicsi ku saabsan caqabadihii nolosha qurbajoogtii Soomaaliyeed ee markii ugu horreysay Yurub soo gala.

Haddaba, akhristeyaasha sharafta leh iyo inta kale ee xiisaynaysa, waxa ay igu la qummanaatay in aan la wadaago sheeko-nololeed kale oo aan taa ka dhicin una xilli dhowayd oo uu noo marinayo nin kale oo ka mid ahaa raggii Soomaaliyeed ee waayadaa sii horreeyay Carabiya iyoYurub yimid.

Sheekadan waxaa markii ugu horreysay soo helay qoraaga Ingiriiska ah, Dr. Richard Panchurst, ee cilmibaarista Itoobiya caanka ku ah. Waxaa uga horreeyay oo sheekada ka wariyay ninka Soomaaliyeed qoraa kale oo Biljam u dhashay magaciisuna ahaa Eugène Gaspard Marin. Ninka Soomaaliyeed, Ibraahin Ismaaciil Cali (ama Caali), iyo Marin waxa ay ku kulmeen magaalada Cardiff ee carri Ingiriis oo uu Ibraahin markaa joogay, waxayna isu raaceen oo muddo wada degganaayeen degmo iskaashato hantiwadaag ah oo ku taal Cotswolds (Gloucestershire) oo Whiteway la yiraahdo. Intii uu halkaa degganaa ayuu Marin ka qoray Ibraahin taariikh nololeedkiisii oo afka Ingiriisiga ku qoran, dabadeedna meel iska dhigay oo kaga tegay.

Si ay ahaydba, Marin waxa uu dhintay sanaddii 1969. Sida uu Dr. R. Panchurst sheegayo, isaga oo cilmibaarid Geeska Afrika (Ethiopia) la xiriirta ku dhex jira ayuu sheekadan oo ay hayso haweenay dhaxalkii Marin ka wakiil ahayd ka dul dhacay. Sidaa ayuu markii ugu horraysay sheekada dhammaanteed oo laba qaybood ah ugu daabacay laba caddad oo ka mid ah majallad la yiraahdo *Africa* oo carriga Talyaaniga ka soo baxda. Labada caddadba sanaddii 1977 ayay soo baxeen.

Wixii faahfaahin ah dib ayaa la iska waraysan doonaa e, sidaan ayay u dhigantahay, aniguna aan af Soomaali idiin ku soo tebinayaa:

Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved

CUTUB 1aad

Dhalasho iyo Korriimo

Waxa aan dhashay gu'gii ***Deera Laaye***. Sanaddaa roob mahiigaan ah, ayaa inta carrada oo dhan ka da'ay daaddadkii iyo dhiirigii uu reebay duunyadii iyo ugaartii oo dhammi ku hafatay oo dhaqaaqi wayday ilaa la gaaray heer ay ugaaratadu aayar deerada iska soo qabqabsato. Aabbahay Ismaaciil Cali waxa uu ka dhashay **Warsangeli**, lafta **Reer Xaaji**, hooyadayna Faadumo Aw Nuux waxa ay ka dhalatay **Dhulbahante**, lafta **Wacays Dheere** [Reer Wacays?]. Xagga aabbe, todoba wiil iyo saddex gabdhood oo dhammaantood iga waawayn ayaa ila dhashay. Saddex sano oo kaliya ayaan jiray markii aabbahay lagu dilay dagaal dhex maray Dhulbahante iyo Warsangeli. Geelii aabbahay waxa uu sidaa ku noqday hanti reeraha oo dhan ka dhexaysa, arigiina (riyihii iyo idihii) waxaa qaybsaday carruurtiisii oo bah walbaa qaybteedii heshay. Sababta garan mayo, laakiin aniga qaybtaydii ariga waxaa kala bartay hooyaday iyo walaalkay Cabdille.

Hooyaday mar kale ayay guursatay, waxayna dhashay ina hooyahay Cabdiraxmaan la yiraahdo. Cabdille, ina aabbo, oo markaa ilaa 25 jir ahaa, ayaa i kafaalaqaaday aniga oo i soo koriyay. Geela reerka oo soddomeeyo ilaa afartameeyo dhammaa ayuu raaci jiray. Beryihii hore garbaha ayuu igu qaadi jiray meel walba oo uu aadayo, markii se aan afar jirsaday hal hebed ah ayaa la i saari jiray. Hashaa ayaan marka la cuntaynayo ka soo degan jiray oo isla iyada la ii lisi jiray. Magaceedu *Xumbey* ayuu ahaa. Ilaa waagaa hashaa qalbigayga meel qaali ah ayay kaga qornayd, maxaa yeelay marna ma illoobi karo sidii ay hooyo labaad iigu ahayd.

Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa waxaa ii muuqatay haweenay meel fadhida, dabadeedna inta ay magacayga iigu yeedhay ayaa ay i tiri "ma i garanaysaa?" Waxaan ugu jawaabay "maya, ma haweenka dunida oo dhan baan aqaan!" Waxay tiri "anigu hooyadaa baan ahay." Waxay i siisay xabbado timir ah oo faraqa ugu xirnaa. Wax aan waligay arkay ma ahayn, sidaa awgeed ayaa waxa aan wayddiiyay in aan ceeriinka ku cuno iyo in kale. Aad ayaan uga helay, wax macaan oo wanaagsanna waa ahaayeen. Sidaa darteed, qaar ayaan meel ku qarsaday. Maalintaa caano ayaannu wadaagnay, habeenkiina laabteeda ayaan ku gam'ay. Subixii dambe ayay igu tiri **Cadcaddo** ii raac, magaalo xeebta ku taal oo ay deggenayd. Halkaa ayaan bad ku arkay oo aad ula yaabay dhanaanka markii aan damcay in aan biyaha cabbo. Aad ayaan ugu raaxaystay in aan bataaxa xeebta ku boodboodo oo carruuro kale kula ciyaaro.

Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved

Waxa kale oo aan aadka uga helay waxa ay ahaayeen guryaha meesha ka dhisnaa ee saqafka cawda labaderyaalaha ah lahaa, derbiyaduna ay ka samaysnaayeen nooc kale oo caw la falkiyay ah. Guri walba saddex qawladood ayuu ka koobanyahay: qolka fadhiga oo dhexda ku yaal, kan jikada oo midigta xiga iyo kan suuliga oo bidixda xiga. Irrid kaliya oo bannaanka laga soo galo, ayaa toos qolka fadhiga kuu geynaysa. Daaqado ma leh, laakiin falag dadab ah ayaa kor loo faydaa si looga neecaysado.

Maalin, ayaan waxa aan arkay hooyo ilmaheedii koob jaban bariis ka siinaysa, markaa ayaan u qaatay in ay koobka canugga inta u jajabiso siinayso. Markii aan geelii ku noqday ayaan wiilashii kale wayddiiyay bal in ay waligood koob cuneen, oo u sheegay in uu wax aad u macaan yahay. Markii xigtay ee aan xeebta booqday ayaan koob jabkii dhadhamiyay. Dhowr isku day haddii wax ka naasacaddaan waayeen, ayaa aan joojiyay qariididda bakeerida.

Muddo yar dabadeed, ayaa saygii hooyo qabay isna waxaa dilay buntukhii ugu horreeyay ee carriga soo gala. Waxa ay ahayd waa sagaal reerahayaga ahayd lagu dilay dagaal ay isaga hor yimaadeen reero kale iyaga oo geel reer lahaa dhicinaya. Intii dagaalku socday. ayaa waxaa u muuqday raggii oo uun hoobanaya. Uma ba ayan qaadan in ay sidaa ku geeriyoodeen. Waxay u qaateen jugta qoriga ka yeeraysaa in ay uun tahay wax lagu baqagelinayo. Markii dagaalkaasi joogsaday, ayaa lagu yaacay in hubkaa oo kale la iibsado, toban sano gudahoodna nin walba oo carriga degganaa qori ayuu yeeshay. Waagaa ka dib ayaa dhammaan xoolihii hooyo haysay reer aannu dagaalsanayni wada dhacay. Sidaa ayaa xoolihii ay ku noolayd oo dhammi ku dhaafeen, kuna khasbanaatay in ay shaqaale dad kale u noqoto. Badanaa qarbad biyo ah ayay dhabarka uga soo qaadi jirtay min **Durduri** ilaa Cadcaddo, maxaa yeelay meeshu biyo macaan oo la cabbo ma lahayn. Mararka kalena qoryo ayay soo guri jirtay ama hawlaha kale ee guryaha laga qabto ayay ka shaqayn jirtay. Aamminnimo dheeraad ah oo lagu bartay darted, ayay reerayawgu marka ay Cadcaddo ka xagaabaxaan furayaasha aqalladooda ku aammini jireen. Guryahaa ayay ilaalin jirtay, hagaajin jirtay oo loogu iman jiray iyada oo wax walbaa diyaar yihiin marka la soo guryanoqdo.

Shan gu' markii aan jiray ayaan bilaabay in aan ragga raaco oo wax la qaybsado. Geela ayaan hadba meeshii loo daaq geeyo u raaci jiray. Badanaa bannaannada ayaannu seexan jirnay oo reeraha kaga dhixi jirnay, habeennada dhaxantu jirtana geela ayaannu dhex seexan jirnay. Roobku hurdada marna igama kacsho, marar dhif ah ayayna dhici jirtay in aan aqal ka galno. Waagu marka uu dillaaco ayaannu kici jirnay oo socon jirnay ilaa kulaylka milicdu na karo oo la socon waayo, markaa oo dad iyo duunyaba hooska geedaha lagu cararo. Waa dhif in ay naga degaan wax aan ka ahayn caano geel oo aannu saddex aqoolood dhanno. Hilib waxaa lagu raynrayn jiray uun mararka neef cawarmo oo sidaa lagu gawraco ama marka dibataag ama ugaar kale la helo. Xabagta ayaa nacnac aannu muudmuudsanno noo ahayd. Waxa kale oo aannu guran jirnay miraha kala duwan.

Sanadda xilliga aan dhereri jiray waxa uu ahaa inta u dhexaysa bilaha Abriil iyo Juun. Waa xilliga ay unugyo geellay ahi inta meel isugu yimaadaan ay bulsho wayni ka samaysanto.

Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved

Intayada carruurta ah ee muddo badan go'doonka ku noolaa, ayaa marakan dhinac isu la baxa oo waqtiga badankiisa tartanno iyo ciyaaro kaga baxa.

Maalin maalmahaa ka mid ah, ayaa annaga oo ciyaarayna shil xun oo naftayda halligi gaaray igu dhacay. Waxa aannu niil **Waaciye**, ban caws leh oo Sool ku yaal. Subax hore ayay carruurtu caws duur dhaadheer inta dab qabadsiiyeen bootimaalaysi isku maaweelinayeen. Waagaas lix ama todoba midkood ayaan jiray. Iyagii ayaan ku dayday oo is iri ka bood adna. Nasiib darro, ololkii ayaan bartanka ugu dhacay. Saaxiibbaday argagax ayay la kala caraareen si ay walaalkay ugu yeeraan oo halkii iiga tageen. Dabkii ayaan aniga oo xanuun aan la malayn karin dareemaya ka xamaartay. Walaakay ayaa markiiba ii soo gurmaday oo reerkii noogu dhowaa i geeyay. Halkii ayaa la i dhayay oo haweenay naxariis badani i baxnaanisay inta neef ido ah la ii qalay, caano arina la iga dharjiyay. Walaalkay ayaa isna laba ama saddexdii cishaba caano geel ii keeni jiray. Ilaa aan ka bogsanayay rati ayaa la igu siday intii dhowr bilood ahayd.

Shil kale, ayaa isna waa kale igu dhacay annaga oo dhawr ah oo geela dhinac hurhurudna halka la yiraahdo **Cawsana** ee **Raacin** ku taal. Habeenbarkii ayaa neef geel ahi inta kacay meel agtayda ah markii uu sii arrumanayay lowga madaxa iga la helay oo daanka hoose i burburshay. Ninkii igu xigay, ayaa dareemay qoyaanka dhiiggaygii, markaa ayuu ba anigii cay iigu sii daray, isaga oo ka caraysan in aan dharka ka wasakheeyay!

Maalin kale, soolka **Habar Shiro,** subax reerayawga oo geeddi ahi ay **Xaygodeen** u hayaamayaan, ayaan dib dhacay si aan miro u gurto. Haddii aan mar dambe madaxa la kacay, yaabka dhacay, dadkii iyo duunyadiiba waa libdheen. Hadba dhinac ayaan u cararay, geed walba oo dheer ayaan u baxay, dhan walba ayaan jeedaaliyay. Haba sheegin, ruux dhaqaaqa lagu ma arko jiho walba. Kaligay oo aan miciin haysan ayaa cidla ciirsi la' la iga dhaqaaqay. Baqdin iyo murugo, ayaa isugu kay yimid oo iska booyay aniga oo hadba meel aan la garanayn isaga cararaya. Saacad ama laba markii aan sidaa ku jiray ayaan mar uun ku soo baxay laba ruux. Waa laba dumar ah oo cayr ah, arrad dartiina aanay calalladu jirka u wada asturi karin. Midddood waayeel ayay ahayd, midina da' dhexaad. Qacdii hore araggooda cabsi uun baan ka sii qaaday. Wax badan ayaa la ii marin jiray sheekooyin dadqalato oo waxaa ii sawirantay in dumarkani ay iyagii yihiin. Markiiba aniga oo cabsi la gariiraya, ayaan dhir gadaal ka maray oo ku gabbaday si aanay ii arag oo inta i dilaan ii cunin. Laakiin haddana fikrad ayaa igu soo dhacday. Maxaan mudan doonaa haddii dadkani sidaa igu dhaafaan? Tolow wax dad ah oo kuwan ka dambeeya ma la kulmi doonaa? Haddii jawaabtu maya tahay, maxaan kale oo fishaa in aan caq ama mici libaax midkood u dhinto mooyee? Sidaa ayaan geesinnimo isaga raadshay oo inta halkii aan ku dhuumanayay ka soo baxay ku dhaqaaqay dumarkii xaggoodii. Dabcan in ayaan u jirsaday, waxaanan diyaar u ahaa in aan cagaha wax ka dayo haddii ay damcaan in ay ii soo dhawaadaan. Waxaan waydiiyay bal in reerahayagii wax ka arkeen. Markii hore waa ila yaabeen. Waxay i warsadeen cidda aan u dhshay, halka aan ka imid iyo waxa aan halka ka qabanayo. Cidda aan u dhashay iyo wixii igu dhacay ayaan u sheegay. Waxay ii sheegeen in ay yihiin haween cayr ah oo xoolahoodii la dhacay, haddana dhulka iska wareega oo ku nool sadaqada reerayowga ay waddada ku maraan. Waxa ay ii

Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved

sheegeen in aanay garanayn halka reerkayagii jiro, laakiin waxay iigu deeqeen in ay i wadaan oo aan iyaga raaco. Sidaa ayaa aan ka yeelay. Waa iska muuqatay in haweenkani aanay dadqallo ahayn, laakiin waxaan is iri haddii ay cunno kale waayaan soo baahidu in ay aniga i dilaan oo i cunaan ka geyn waayi mayso? In door ah ayaan mar walba gadaal u jirsanayay, si mar haddii xaalku xumaado markaba aan fagax u oran karo oo aanay jaan iyo ciribtayba arag.

Markaa goor barqo ah ayay ahayd. Milicdii maalmeed ee kululayd ayaannu cagta waddada saarnay. Casarkii ayaa jidkii aannu haynnay waxaa jaray raadka geel tobaneeyo ah oo is daba qoodaynaya, laba ilaa saddex ninna waddo. **Buraan** ayay ka soo waraabiyeen xagga carri **Majeerteen** ayayna u fuleen. Waa degdegay si aan u gaaro. Markii aan u soo dhowaaday, ayaa nin iyagii ka mid ahi ii yimid oo iga qaaday daab gudimeed aan garabka ku sitay. Daabka sidii ul aan geela ku kaxeeyo ayaan u adeegsanayay. Markii uu xaqiiqsaday in gudintu aanay bir lahayn ayuu ii soo celiyay oo i warsaday cidda aan ahay, halka aan ka imid iyo halka aan u socday. Xaalkaygii ayaan uga sheekeeyay, isagiina waxa uu ii sheegay in uu yaqaan halka reerkayagii ku suganyahay oo ii tilmaamay jihada qumman ee loo aado. Aniga oo aan xataa nabadgelyo oran wehelladaydii ayaan orod isa sii daayay, intii cagahayga daallani i bixin kareen. Abbaaraha saacad barkeed ka dib ayaan isa soo taagay Xaygodeen. Halkaa oo reerihii lagu furay ayay iiga muuqdeen raggii oo ood xeryaha lagu oodo guraya. Markii aan isa soo taagayba xoogaa caano ah oo maantaa ka haray ayaa la ii dhiibay, dabadeedna dhenged ayaa la ii qoray si cashar la ii baro oo hadda ka dib maanta wixii dhacay oo kale aan uga feejignaado.

Waa dambe, ayaan inta geelii ka cararay oo Cadcaddo aaday hooyaday dhowr bilood la soo joogay. [Jadeeco?] ayaa magaalada ka dilaacday markii aan tegay, hooyaday ayaana si wacan ii dhaqaalaysay oo saddexdayadaba [isaga, walaalki iyo hooyadood] aad noogu shaqaysay. Waagaa ayay ahayd markii iigu horreysay ee aan kalluun dhadhansho. Niman kalluumaysato ah, ayaa carruur xeebta joogtay xoogaa siiyay, anigana iyagii ayaa qaar iga siiyay oo i tusay sida loo bisleeyo. Markii aan geelashii ku noqday oo u sheegay in aan kalluun taabtay ayay igu yiraahdeen waa in aad gacmaha si qumman isaga maydhaa, maxaa yeelay waxaa ka dhaadhacsanaa in geelu gaagaxayo haddii uu u soo dhawaado qof waxyaalahaa wasakhda leh sida kalluun, timir, bariis iyo wixii la mid ah faraha ku soo taabtay.

Aniga waxa aannu saaxiibbo gaar ah ahayn Ciise Xasan iyo Xuseen Xasan. Labada kan hore isku fac ayaannu ahayn, kan kalena gu' kaliya ayuu iga yaraa. Ciise iyo aniga mar walba dagaal ayay noo ahayd. Sanadda badankeeda guriga ayuu reerkooda kula noolaa. Marka se gugu da'o ayaannu aad ugu farxi jirnay in aan mar kale is helno. Bisha hore oo dhan aniga ayaa ka adkaan jiray, maxaa yeelay muddo ayuu goobaha jirdhiska ka maqnaa, bishaa wixii ka dambeeya se waa iska kay dhicin jiray oo badanaa barbardhac ayaannu ahayn. Xuseen isaga waa isu badnayn. Aabbihi iyo walaalkayba waxa ay ahaayeen rag geelooda nooca wanaagsan ee [Cayuunka?] ah aad u jecel. Waxa geeloodu ay geelasha kale uga qurux badnaayeen waxa ay ahayd iyaga oo dhib walba u mara sidii ay meesha ugu daaqa wanaagsan u geyn lahaayeen, badanaana labada geel waa la isla hayn jiray.

Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved

Si ay ahaydba se, sanad ayaannu kala baadnay. Ciise xagga *guban*ta ayuu qabtay aniguna *oogada* ayaan joogay. Sanadkii dambe ayaannu ku kulannay **Macag**, banka kulaylka badan ee labada degaan u dhexeeya. Aad ayaannu ugu faraxnay in aan dib isu aragno, si wanaagsan ayaa aan u xusuustaa raynrayntii aan dareennay. Ciyaarta aannu ugu jeclayn waagaa waxa ay ahayd *dhumaaleysi*ga geella dhexdiisa. Midkayo ayaa meel ciriiryoon oo geella dhexdiisa ah ama hal hoosteed ku dhuunta. Halkaa ayaa kan kale saaxiibki ka goobaa inta geella dusha uga baxo.

Habeen dambe ayaa waxa aannu u hoyannay meel geedo gaagaaban oo xabag lehi ay ka baxaan. Yaabka dhacay, saaxiibkay Xuseen galabkaa waa ku kari waayay in uu ila ciyaaro, markii aan wayddiiyay waxa helayna waa ii jawaabi waayay. Mar dambe ayaan arkay isagii oo meel cidla' ah kaligii booyaya. Murugada haleeshay ayaan wayddiiyay. Waxa uu iigu jawaabay "meeshu waa halkii haramacadku walaashay Caasha ka qaatay." Intaa markii aan maqlay ayaa illin aanan celin karini i soo dhaaftay, dabadeedna habeenkaa labadayaduba toos ayaannu isaga seexannay. Subixii dambe iyo intii aannu meesha ku negayn oo dhan ciyaari waa noo bixi wayday.

Beryahaa ayaan mar xanuusaday. Markii dadkaygii arkay in aan sii caatoobayo oo tabardarraynayo, calooshuna i barartay, ayay dhaqtar ii raadsheen. Dhulka ayaa dhabbac la ii dhigay oo afar nin oo xoogxooggani i qabatay intii dhaqtarku makiinadda igu sarsarayay. Sagaal sarmo oo saddexagallo saddex wareeg oo isku xeeran ah ayuu calooshayda ku dhigay. Dhabarkana intaa oo kale ayuu iiga dhigay. Min saddex sarmo oo qoton dherer ah isu barbar yaal labada naas ayuu ibta korkeeda iyo hoosteeda iiga dhigay. Ugu dambaynna far walba caaraddeeda ayuu sarmo ciddida ballac jiif ah ula yaal iga jeexay. Intaa markii ay dhammaatay ayaa inta nabarradii oo dhan milix la mariyay la igu yiri "xanuun daqiiqado kugu dhaafaa ka roon jirro gu'yaal kugu raagta." Neef ayaa dabadeed la ii qalay oo hilib kulul la iga siiyay.

Markii aan sagaal jiray ayaan mar kale dab ku sigtay. Geella ayaannu inta Durduri ka soo waraabinnay Macag u wadnay. Maadaama habeenku qaboobaa ayaannu dab shidannay, aniguna agtiisa ayaan seexday. Goor dambe ayaa tulud agtayda arrunnayd damacday in ay fadhiga beddelato oo anigii dhimbilihii casaaday igu riixday. Nasiib wanaag, qayladaydii ayaa neefkii didisay oo kicisay. Markan gacanta bidix ayaan si xun uga gubtay, sidaa darteed ayaa walaalkay dhankii Cadcaddo iyo hooyaday ii qaaday oo aan muddo la soo joogay.

Sanad dabadii, ayaa walaalkay Cabdille guursaday oo naga guuray. Mar kale ayaa la igu wareejiyay ina aabbe kale. Kani mid naxariis daran ayuu ahaa oo markii uu dhowr mar i dilay ayaan go'aansaday in aanan arxandarradiisa sii dhawran oo isaga tegay. Waxaa ii dheeraa, nolosha magaalada ayaan ka door bidayay tan geeljirenimada, maxaa yeelay magaalada fursad dheeraad ah oo aan ciyaallada kale kula ciyaaro ayaan ka helayay. Sidaa ayaan ku goostay in aan baxsado, in kasta oo aan markaa toban gu' oo qura jiray.

Maalintii Cabdille guursaday isla subaxii xigay ayaa aan Cawsana oo ahayd halkii aannu markaa niil ka soo dhaqaajiyay oo Cadcaddo oo aan hooyaday ku ogaa afka saaray. Afar

Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved

habeen ayaan dhexda ku sii dhaxay. Habeenkii labaad reer lo'lay ah ayaan ku hoyday oo caano lo'aad ayaa la ii lisay. Caanahaa ayay ii ahayd oomatida kaliya ee iga degtay intii aan sadcaalkaa ku jiray. Waxa aan si fiican ugu xusuustaa in ay ahayd markii iigu horreysay ee aan caano lo'aad dhadhansho. Markii aan Cadcaddo gaaray ayaan ku naxay in hooyaday aanay joogin oo ay Laas Qaray aadday. Bil ama laba ayaan Cadcaddo sii joogay oo waqtiga badankiisa isku dhaafin jiray jillaabashada Mallayga oo dab xeebta aan ka shito ku bislaysan jiray.

Intii halkaa aan joogay ayaan maqlay meel **Cadan** la yiraahdo. Meel barwaaqo ah oo timirta iyo waxyaalaha kale ee macmacaan laga keeno. Waxaan maqlay in marka halkaa la tago qofku inta uu suuqa tago wixii wanaagsan ee uu doonaba iska soo qaadanayo, carruuro badan oo lala ciyaaraana ay dhoobanyihiin. Waxaa kale oo halkaa aad ka soo baran kartaa Carabi iyo cilmi kale oo badan.

Maalin dambe ayaan xeebta waxaan ku arkay nin dooni ku raraya faleen oo magaaladaa cajiibka ah [Cadan] u socda. Baryo ayaan ninkii garka iyo jilbaha qabsaday in uu i qaado, ugu dambayntiina waa iga yeelay. Sidaa ayaan ku shiraacannay. In kasta oo naakhuudaha doonida aannu isku reer ahayn, haddana cidina dan iima gelin intii aannu safarka sii ahayn. Xilliga cunnada ayuun baan eegan jiray oo isa soo xaadirin jiray, aniga oo og in aan marnaba la iga ceshanayn.

Filo qayb kale oo xiiso badan, Rabbi idanki.

Tixraac:

Richard Pankhurst (tifaftire) and Ibrim Ismaciil

"AN EARLY SOMALI AUTOBIOGRAPHY" oo ku qoran -

***Africa**: Rivista trimestrale di studi e documentazione dell'Istituto italiano per l'Africa e l'Oriente. Anno 32, No. 2 (Giugno 1977) bogagga 164-170.*

Boodhari Warsame

bodhari.warsame@gmail.com

Copyright © 2013 WardheerNews, All rights reserved